UW Medicine

Xeerarka Maamula iyo Hannaanka

KAALMADA DHAQAALAHA

XEEERKA

Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha waxaa loogu Talogalay dadka deggan Gobolka Washington kaas oo taagan ama ku dhaw heerka saboolnimda fadaraalka si ay u helaan Adeegyada Caafimaadka Isbitaalka ee Munaasabka ah iyo Adeegyada Caafimaadka aan Isbitaalka Ahayn iyaga oo ku helaya kharash ay awoodaan oo ay ku bixin karaan adeegyada iyo wixii kale ee ay kamid yihiin daryeelka bilaa kharashka ah. Kaalmada Dhaqaalaha waxa la siin qofka kasta oo u-qalma iyada oon loo eegayn da'da, isirka, midabka, diinta, jinsiga, doorashada jinsiga, ama waddanka qofku ka soo jeedo sida uu dhigayo WAC Cutubka 246-453 iyo RCW 70.170.

HELITAANKA XEERKA

UW Medicine waxaa laga rabaa inay bixiso wargelinta barnaamijkeeda Kaalmada Dhaqaalaha iyo waxayna dadaal daacad ah u galin doontaa inay siiso bukaan kasta macluumaad la xidhiidhi jiritaankiisa. Isbitaalada UW Medicine (rugaha/xarumaha caafimaadka bukaan-jiika iyo bukaan-socodka isbitaalka) waxay ku soo dhejin doonaan calaamado Halka laga Galo, La-talinta Dhaqaalaha, Waaxda Gurmadka Degdegga ah iyo meesha ay Bukaan-socodku iska Diwaan Geliyaan kuwaas oo dadwaynaha u sheegaysa Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha. Xarumaha POS 11 loogama baahna in uu xogtaa lagu soo dhejiyo. U-qalmidda Kaalmada Dhaqaale waxay u baahan tahay in uu bukaanadu buuxiyaan shuruudaha iyo waxyaabo looga fadhiyo oo dhan kuwaas oo lagu sheegay Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha. Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha iyo arjiyada Kaalmada Dhaqaalaha waxaa lagu heli karaa luuqad kasta oo ugu yaraan boqolkiiba shan ku hadlaan bulshada ama 1,000 qof ay deggan yihiin aagga isbitaalka adeegga bixinaya. Sidoo kale, adeegyada turjumaadda ayaa u diyaar ah dadka aan ku hadal Ingiriisiga ama ay liidato Ingiriisigoodu ama bukaanada kale ee aan akhriyi karin ama fahmi karin qoraalka arjiga.

QEEXDIMO

Kaalmada Dhaqaalaha: Daryeelka caafimaad ee isbitaalka ee daawaynta daruuriga ah waxaa la sameeyo dadka dhaladka ah marka Shirkad Caymis ahi bixinayso, hadii ay jirto, ee wixii kale lagu wada eegey, ilaa marka la gaadho heer aanu qofku iska bixin karin daryeelka ama inuu bixi in laga goosto ama xadiga caymis wadareedka taas oo cid kale looga baahan yahay inay bixiso taas oo ku salaysan shuruudada xeerka.

Dadka aan helaynin cid kale oo caymissaddexaad oo ka bixisa, oo ay kamid yihiin Medicare iyo Medicaid, iyo kuwa dakhligoodu yahay 300% ama uu ka hooseeyo heerka saboolnimda fadaraalka, oo la waafajiyey xajmiga qoyska ama sida kale aan u awoodin in uu bixiyo kharashka daryeelka ama dhidhatibaliska ama xaddiyada caymis wadareedka oo ay u baahan tahay cidda kale ee saddexaad lacag-bixiye ah, waxa uu u qalmi karaa Kaalmada Dhaqaalaha sida uu dhigayo xeerkani [1].

UW Medicine: Ujeedooyinkan xeerkan, "UW Medicine" waxaa kamid ah Airlift Northwest (Airlift), Harborview Medical Center (HMC), UW Medical Center (UWMC), Northwest Hospital & Medical Center (NWH), UW Physicians (UWP), Valley Medical Center (VMC), iyo UW Neighborhood Clinics (UWNC).

Adeegyada Caafimaadka Munaasabka ah ee Isbitaalka: Adeegyada isbitaalka UW Medicine ee macquulka ah ee baadhista, sixidda, daawaynta, kaar-jabinta, ama kahortagga xaalado sii xumaanaya oo nolosha khatar ku ah, ama keeni karta xanuun ama silic, ama horseedi karta cudur ama tabcaanimo, ama keeni karta ama khatar u ah laxaad la'aan, keenaysa qaab darro jidheed ama jajab, oo ayna jirin wax kale oo la saamayn ah, oo ka jaban oo lagu daawayn karo ama ku munaasab ah qofka codsanaya adeegga. Daawaynta waxaa kamid noqon kara la-socod kaliya ama, meesha ay ku habboon tahay, daawayn la'aan. Adeegyada Isbitaalka ku salaysan kama mid aha daryeelka Goobta Adeegga 11 (POS 11) xarunta caafimaadka/xafiisyada dhakhtarka gaarka ah xataa haddii wada shaqayn uu la leeyahay isbitaalka UW Medicine. Hase yeeshee, shuruudaha waxaa kamid ah adeegga xirfadlaha ee isbitaalada ay ku bixiyaan shaqaalaha HMC, UWMC, UWP, VMC, iyo NWH, iyo Laamaha ay Gabi Ahaan Leedahay NWH.

[1] Hay'adaha UW Medicine ee kaqaybqaadanaya wax kamid ah barnaamijyada fadaraalku maalgalinayo kuwaas oo u baahan u dhigista kharashka qaab ka duwan ka ku cad xeerkan waa in ay raacaan shuruudaha kharashka barnaamijka.

Adeegyada Caafimaadka Munaasabka ah ee aan Isbitaalka Ahayn: Adeegyada lagu bixiyo (1) Airlift, ama (2) Goobta Adeega 11 (POS11) xarunta caafimaadka/xafiisyada dhakhaatiirta madaxa bannaan ee ay qabtaan Xubnaha UWP, Shaqaalaha NWH, ama shaqaalaha Laamaha ay Gabi Ahaan Leedahay NWH, kuwaas oo si macquulka ah loo xisaabiyay in lagu baadho, saxo, daaweeyo, kaar-jabiyo, ama lagaga hortag xaalad sii xumaanaysa oo nolosha khatar ku ah, ama keeni karta xanuun ama silic, ama horseedi karta cudur ama tabcaanimo, ama keeni karta ama khatar u ah laxaad la'aan, keenaysa qaab darro jidheed ama jajab, oo ayna jirin wax kale oo la saamayn ah, oo ka jaban oo lagu daawayn karo ama ku munaasab ah qofka codsanaya adeegga. Daawaynta waxaa kamid noqon kara la-socod kaliya ama, meesha ay ku habboon tahay, daawayn la'aan. Ujeedooyinka Xeerkan Kaalmada Dhaqaale, adeegyada daryeelka kahortagga waxaa loo qaadan karaa "Adeegyada Caafimaadka Aan Isbitaalka Ahayn ee Munaasabka ah".

Xaaladda Caafimaadka Gurmadka Degdegga ah: Xaalad caafimaad oo tusaysa inay ay aad u adag tahay xagga astaamaha oo daran awgood, oo ay kamid yihiin xanuun daran, taas oo haddii aan la helin daawaynta degdeg ah la filan karo inay horseedi karto:

1. In qofka caafimaadkiisa (ama, gabadha uurka leh, caafimaadka gadbadha ama ilma uurka ku jira) ay khatar galin karto;
2. Dhantaalni halis ah oo shaqooyinka jidhka ku timaad;
3. Xubin ama qayb jidhka ah oo halis u gasha inayna sax u shaqayn.

Marka la eego gabadhaha uurka leh ee ay fooshii hayso waxa ay noqonaysaa:

4. Marka wakhti ku filan oo isbitaal kale loogu gudbiyaa oo ilmaha lagaga dhaliyaa jirin; ama
5. Gudbintaa isbitaalka kale loo gudbinayaa uu khatar ku keenayo caafimaadka ama badbaadada gabadha ama ilmaha aan dhalan.

Goobta Adeegga 11 (POS 11): Ujeedooyinka xeerkan, tibaaxdan waa in lagu sheegaa dhammaan goobaha Xarumaha Caafimaadka UW iyo wixii xarumo ama xafiis dhakhtar madaxbannaan ee aan isbitaalka ahayn ee ay bixiyaan xirfadlayaal daryeelka caafimaad ah adeegyo oo ay soo dallacdaan lacagta adeegyadaas.

Xubnaha UW Physicians (UWP): Ujeedooyinka xeerkan, dhakhaatiirta ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaad kuwaas oo la galay heshiiska shaqo UWP, ama oo si kaleba adeegyadooda dib loogu qoray UWP heshiis ay galeen dartii, oo ka bixiya adeegyo baraha shaqada ee ay ansixisay UW Medicine.

Laamaha ay Gabi Ahaan Leedahay NWH: Ujeedooyinka xeerkan, tibaaxdan waxaa kamid ah Summit Cardiology iyo wixii kale ee laamo hoos yimaadda ama hoos iman kara lahaanshaha dhammaystirka tiran ee NWH ee ah hay'adaha looga tagay ujeedooyinka cashuurta fadaraalka.

SHURUUDAHA U-QALANKA

Dadka dalbanaya Kaalmada Dhaqaale waa inay buuxiyaan shuruudaha u-qalanka oo ay dhammaystiraan nidaamka arjiga, sida ku cad halkan.

Degganaanshaha iyo Baaxada Adeegyada

U-qalmidda Kaalmada Dhaqaalaha waxaa shuruud u ah in uu qofku deggan yahay Gobolka Washington oo ay adeegyada daawayntuna yihiin Adeegyada Caafimaad ee Isbitaalka ee Musaanabka ah, taas oo kasoo horjeedda adeegayda dabagal, doorasho ama tijaabo. Qofku ma aha mid deggan Gobolka Washington umana qalmin Kaalmada Dhaqaale marka uu qofkaasi uu u yimi Gobolka Washington kaliya ujeeddada inuu helo daryeel caafimaad. Qaxootiga, iyo dadka magangalyo-doonka ah kuma jiraan dadka laga rabo shardiga degganaanshaha Gobolka Washington si ay u-qalmaan Kaalmada Dhaqaalaha. Sidoo kale shardiga degganaanshaha Gobolka Washington waxa laga dhaafay bukaanada qaba Xaalad Caafimaad oo Degdeg ah. Kaalmada Dhaqaale la iskuma diido xaaladda soo-galaytinimo. Shuruudaha dadka aan ku jirin degganaanshaha iyo baaxada adeegga ee lagu sheegay qaybtan waxaa kaliya la samayn karaa marka ay jiraan xaalado adag ee sidoo kalena uu ansixiyo Sarkaalka Madaxa Dhaqaalaha UW Medicine ama cid matalaysa. In kasta oo aanu waajibinaynin sharciga fadaraalka ama gobolka, u-qalmidda Kaalmada Caafimaad waxaa la siin doonaa shakhsiyaadka hela Adeegyada Caafimaad ee Aan Isbitaalka Ahayn ee Munaasabka ah ee ka soo baxa shuruudaha sare.

Bixinta Cid Kale Oo Saddexaad

Kaalmada Dhaqaale guud ahaan waa ikhtiyaarka labaad ee marka laga tago qofku inuu haysto caymis kale oo ka bixinaysa.

Waxa kamid ah tan:

1. Caymis caafimaad oo wadareed ama shakhsi ahaaneed.
2. Barnaamijyada magdhawga shaqaalaha.
3. Medicare, Medicaid ama barnaamijyo kale oo kaalmada caafimaadka ah.
4. Barnaamijyo kale oo gobolada kale, fadaraalka ama ciidamada ah.
5. Xaaladaha ay cid kale ku khasban tahay. (taas oo ah: shilalka baabuurta ama dhaawac shakhsi ahaaneed).
6. Gunooyinka caafimaadka qabiilada.
7. Wadaaga daryeelka caafimad ee wadaaradu sida cad 26 U.S.C. Sec. 5000A.
8. Xaalado kale oo dad kale ama hay'ad kale uu sharcigu ku khasbayo inay bixiyaan kharashka adeegga caafimaad.

Bukaanada sida kale ugu qalma Kaalmada Dhaqaale kuwaas oo aan raacaynin helidda caymis wadareedka ee dhici karto inay mustaqbalka helaan (sida, Medicaid) si shakhsi ahaan ah ayaa loo qiimayn.

Kahor intaan loo qaadan Kaalmada Dhaqaalaha, waxaa la eegi doonaa bukaanka/dammiinka in uu u-qalmo inay cid kale ka bixiso kharashka waxaana loo sheegi karaa bukaanka/dammiinka inuu dalbado barnaamijyadaa uu u-qalmo. Dadka aan u hoggaansamin shuruudaha arjiga Kaalmada Dhaqaale waxaa dhici karta in loo diido kaalmada dhaqaale. Bukaanka doorbiday inaanu dheefaha Medicaid qaadan iyada oo u-qalmo Medicaid waxaa dhici karta in loo diido Kaalmada Dhaqaale; hase yeeshee, UW Medicine ugu diidi mayso bukaanka Kaalmada Dhaqaale kaliya maadaama oo bukaankaasi diiday in uu galo caymis bukaan u diyaar ah Isdhaafsiga Dheefaha Caafimaadka.

Dakhliga

Xeer ahaan, dadka uu soo galo dakhli le'eg ama kayar 300% oo heerka saboolnimda fadaraalka ah waxa ay u-qalmi karaan inay qaataan Kaalmada Dhaqaalaha. UW Medicine waxay eegi doontaa dhammaan ilaha dakhliga si ay u sugto u-qalmidda Kaalmada Dhaqaalaha. Dakhliga waxaa kamid ah: isu-gaynta lacagta caddaanka ah ee mushaharka iyo gunnooyinka cashuurta intaan la bixin; lacagta caydha; lacagta Sooshiyaal Sikiyuuriti (Social Security); dheefaha mudaharaadka; dheefaha bilaa camalka ama naafonimada; biilka carruurta; biilka qoys aad kala tagteen; faa'idada laga helay ganacsi ama shaqo maalgalineed oo uu helay shakhsiga bukaanka/dammiinku.

ARJIGA

Marka uu bukaanku doonayo in uu dalbado Kaalmada Dhaqaale, bukaanku waa in uu buuxiyaa Foomka Xogta Dhaqaale ee Qarsoodiga ah sidoo kalena keenaa dokumentiyada xoojinaya ee dhaqaalihiisa ee galinaha CFI. UW Medicine waxay marka hore caddaysaa xaaladda Bukaanka ee Kaalmada Dhaqaale marka uu soo galayo isbitaalka ama sida ugu dhakhsaha badan kadib marka bukaanka adeegyada loo bilaabo. Arjiga Kaalmada Dhaqaaluhu ma aha inay culays aan macquul ahayn saarto qofka bukaanka, iyada oo maanka lagu hayo wixii caqabad ah ee awoodda bukaanka carqalad ku ah ee ka baajinaya in uu u hoggaansamo hannaanka arji. Baadhista u-qalmidda Medicaid ama dheefaha kaalmada dadwaynaha ee kale ee la midka ah waxaa ka shaqaynaya Waaxda Helidda Bukaanka, Maamulka Qorshaha/Natiijada Ka Bixidda (haddii ayna ahayn kaalmo caafimaad oo guriga ah) ama iyadoo la marayo Adeeyada Dhaqaalaha Bukaanka.

1. Wax kasta dokumentiyada soo socda kamid ah waa in loo tixgaliyaa inay yihiin caddaymo ku filan kuwaas oo lagu salayn karo go'aanka u-qalanka Kaalmada Dhaqaale:
    a. Bayaanka cashuur jarista "W-2";
    b. Waraaqaha mushaharka ee wakhtigan (3 bilood);
    c. Bayaanka Bangiga (3 bilood);
    d. Cashuurta dakhliga sanadkii hore, oo ay la socdaan jadwalladu, haddii ay ku munaasab tahay; ;
    e. Bayaano qoran, oo saxeexan ee cidda loo shaqeeyo ama cid kale (warqad caddayn ah) oo lagu sheegayo xaaladdaada dhaqaale ee wakhtigan iyo xaaladdaada haddii aanad lahayn caddayn dakhli
    f. Foomam ansixinaya ama diidaya u-qalankaaga Medicaid iyo/ama kaalmada caafimaadka gobolku bixiyo;
    g. Foomam ansixinaya ama diidaya magdhawga shaqo la'aanta; ama bayaan qoraal ah oo cidda loo shaqeeyo ama hay'adaha caydha ka socota.
2. Sidoo kale, marka aanu bukaanku keeni karin wax waraaqaha caddaynta ah ee kor ku xusan, UW Medicine waa inay ku xisaabtantaa bayaanada qoraalka ee saxeexan ee ka socda cidda masuuliyaddeeda leh ama cid kale kuwaasi oo sharxaya dakhliga dalbadaha. Haddii aan waxba la haynin kuwa sare, UW Medicine waxa uu go'aankiisa ku salayn doonaa isaga oo tixraacaya aqoonta kaalmada dhaqaale ee UW Medicine ee hore loo bixiyay ama sida qofku ugu soo bandhigay hadal ahaan.

UW Medicine waxa uu ka tanaasuli karaa shuruudaha dakhliga, dokumentiyada iyo caddaynta haddii u-qalmidda Kaalmada Dhaqaale iska caddahay. Waxa ay go'aamiyaan shaqaalaha UW Medicine ayaa lagu dhaqmi doonaa xaaladaha ay jiraan caqabado bulsho ama caafimaad. Mararkan oo kale, UW Medicine waxay ku gaabsan doontaa bayaanada qoraalka ee saxeexan ee cidda ka masuulka ah si loo caddeeyo u-qalmidda ugu danbaysa.

SHURUUDAHA DHAQAALAHA

UW Medicine waxay siin doontaa Kaalmo Dhaqaale oo dhammaystiran bukaanka/dammiinka dakhliga qoyskiisu le'eg yahay ama kayar yahay 300% heerka saboolnimda fadaraalka ee wakhtigan.

Marka xaaladaha caddayn ahaan loo hayaa muujinayaan xaalad dhaqaale oo qalafsan, UW Medicine waxay samayn kartaa inay u baddasho biilalka la dallacay kaalmo dhaqaale marka la eego dadka dakhliga qoyskoodu uu ka sarreeyo 300% ee heerka saboolnimada fadaraalka ee wakhtigan. [2]

Marka qofka ka masuulka ah uu bixiyo qayb ama dhammaan kharashkii Adeegyada Caafimaadka Isbitaalka ee ku Munaasab ah ama Aan Isbitaalka Ahayn ee ku Munaasabka ah ee ay waliba muuqato in uu waafaqsan yahay shuruudaha Kaalmada Dhaqaale ee xeerkan, dhammaan lacagtaa la bixiyay waa in dib loogu celiyaa ciddii bixisay 30 maalmood gudahood oo ka bilaabanta markii UW Medicine ay go'aamisay u-qalanka bukaanka ee Kaalmada Dhaqaalaha. Xog dheeraad ah waxaa laga heli karaa xeerka biilka iyo ururinta isbitaalada ay khusayso.

HANNAANKA

Cidda ka Masuulka ah: Adeegyada La-talinta Dhaqaalaha iyo/ama Dhaqaalaha Bukaanka

A. Tilmaamaha/Tallaabooyinka

Xisaabaadka loo diray hay'adda ururinta daymaha ee xukun maxkamadeedna loogu oggolaaday wax samofal ah uma qalmaan. Bukaanku samofal wuu dalban karaa wakhtiga uu doono inta ka horreysa inaanu soo gaadhin xukun maxkamadeed. Arjiga waxaa kamid ah Foomka Xogta Dhaqaale ee Qarsoodiga ah iyo Tilmaamaha Foomka Xogta Dhaqaalaha ee Qarsoodiga ah (ka eeg lifaaqa 1) kuwaas oo taxaya dokumentiyada loo baahan yahay ee qaybta ka ah nidaamka qiimaynta kaalmada dhaqaale.

Bukaanka waxaa laga baadhi doonaa in uu u-qalmo barnaamijyada kale ee sida Medicaid iyo Health Benefits Exchange (Isdhaafsiga Dheefaha Caafimaad).

Arjigan, oo ay la socoto dokumentiyada xoojinta ee warbixinta xaaladda dhaqaale, waxaa loola dhaqmayaa wixii ugu danbeeyay ee lagu cadaynayay u-qalanka.

UW Medicine bilaabi mayso inay isku daydo inay bilawdo dadaalo ay daynta ku ururinayso ilaa la gaadho go'aanka hore ee xaaladda u-qalanka Kaalmada Dhaqaale. Marka ay caddayso UW Medicine bukaanku in uu u-qalmi karo Kaalmada Dhaqaale, wixii kale ee ah tallaabooyinka ururinta biilasha a (sida tallaabooyin madani ah, mushahar la wareegis, iyo la socodsiinta hay'daha qaada daynta) waa in la joojiyaa ilaa go'aanka ugu danbeeya laga soo saarayo u-qalmidda Kaalmada Dhaqaale. Hase yeeshee, sida uu dhigayo WAC 246-453-020 (5), haddii aanu bukaanka ama cidda ka masuulka ahi aanay dhammaystirin hannaanka buuxinta arjiga Kaalmada Dhaqaalaha sida ku cad xeerkan waxay noqonaysaa sabab ku filan inay UW Medicine bilawdo ururshada kharashka ee bukaanka ku aaddan. Sida uu dhigayo, ujeedooyinka xeerkan, bukaanka ama cidda ka masuulka ahi haddii ayna dhammaystirin buuxinta hannaanka arjiga kaalmada dhaqaalaha taas oo aanu bukaanka ama cidda ka masuulka ahi aanay kusoo gudbin wixii arjiga la socda muddo 15 maalmood ah oo ka bilaabanta marka ay bukaanka ama cidda ka masuulka ah soo gaadhaan agabku. Dadaal kasta oo loogu jiro ururshada kharashka hakad ayaa la galinayaa haddii bukaanka ama cidda ka masuulka ahi ay dib u bilawdo nidaamka arjiga.

Waa in UW Medicine ay go'aanka kama danbaysta ah kusoo saartaa 14 maalmood gudahood marka ay hesho arjiga kaalmada dhaqaalaha iyo dokumentiyada xoojinaya. Dokumentiyada xoojinaya waxaa kamid ah liiska lagu sheegay Tilmaamaha Foomka Xogta Dhaqaale ee Qarsoodiga ah.

---

[2] Iyada oo la dhaqangalinayao Sharciga Dhawrista Bukaanka iyo Daryeelka Raqiiska ah, isbitaalada samofalka ah ee loo aqoonsan yahay ururada 501(c)(3) (ay kamidka yihiin **Northwest Hospital and Valley Medical Center**) waa inay xaddidaan kharashka ay ka qaadayaan gurmadka degdega ah ama daryeelka caafimaad ee daruuriga ah dadka kaalmada u-qalma ee hoos yimaada Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha taas oo aan ka badnayn inta caadiyan ay ku dallici lahaayeen qof caymis leh sidoo kale waxaan laga qaadaynin "kharashka guud" dadkan. *Eeg* 26 USC §501(r)(5)(A) iyo (B). Northwest Hospital iyo Valley Medical Center waxay buuxiyeen shuruuddan iyaga oo ka daayay kharashka dadka u-qalma kaalmada dhaqaale sida uu dhigayo xeerkani. Northwest Hospital iyo Valley Medical Center waxay bixiyaan xog ku saabsan xeerkan oo ay siiyaan hay'adaha samofalka iyo kuwa dadwaynaha ee ka shaqeeya baahida caafimaad ee bulshadooda dhaqaalaha hooseysa. Sidoo kale, Northwest Hospital iyo Valley Medical Center waxay hayaan guudmarka luuqada cad ku qoran ee xeerkan, oo ku qoran luuqadaha ay ku hadlaan ugu yaraan 5% dadku ama 1,000 shakhsi oo deggan aagga isbitaalka u adeego. Northwest Hospital iyo Valley Medical Center waxay ku bixin nuqullo xeerkan ah, guudmarkooda luuqadda cad ku qoran, iyo arjiga bilaa lacag oo dhammaantood kujira websaytkooda, marka laga codsado halka adeegyada caafimaad laga bixiyo iyo iyadoo loo marinayo boosta US ee: Northwest Hospital Patient Financial Services, 10330 Meridian Ave N., Suite 260, Seattle, WA 98133-9851; (206) 668-6440 ama (877) 364-6440; (furan I ilaa J, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo) iyo Valley Medical Center Financial Counseling, 400 South 43rd St., Renton, WA 98055-5010; (425) 690-3578; (furan I ilaa J, 8:30 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo).

B. Wargelinaha

UW Medicine waa inay ku wargelisaa dadka dalbanaya Kaalmada Dhaqaale ee lagu caddaynayo inay u-qalmaan Kaalmada Dhaqaale 14 maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka la helo arjiga uu qofku buuxiyey ee Kaalmada Dhaqaale iyo wixii dokumentiyo xoojin ah. Ansixinaha, Codsiyada Xog Dheeraad ah ama Diidmooyinka araajida Kaalmada Dhaqaaluhu waa in ay ahaadaan qoraal waana inay la socotaa tilmaamaha rafcaanka looga qaadan karo ama dib u eegis lagu heli karo. Marka ay Kaalmada Dhaqaalaha diido UW Medicine, waa in Daawaynta UW ay ku wargelisaa qofkii soo dalbaday Kaalmada Dhaqaalaha waxa loogu diiday. Haddii loo diido bukaanka/dammiinku waxa uu u keeni karaa dokumentiyo xoojina oo dheeraad ah UW Medicine ama waxa uu ka codsan karaa in dib u eegid uu ku sameeyo Madaxa Sarkaalka Dhaqaalaha ama cida matalaysa muddo 30 maalmood gudahood ah marka wargelinta diidmadu soo gaadho. Haddii dib u eegiddani ay xoojiso diidmadii hore ee Kaalmada Dhaqaale, wargelin qoraal ah ayaa loo diri doonaa bukaanka/dammiinka iyo Waaxda Caafimaadka sida uu sharciga gobolku dhigayo.

C. Diwaanada Dokumentiyada

Dhammaan xogta la xidhiidha arjiga sirtooda ayaa la ilaalin doonaa. Nuqullada dokumentiyada xoojinta ah ee arjiga waxaa lala kaydin doonaa foomka arjiga kaalmada dhaqaale waxaana la hayn doonaa toddoba sano.

XIRFADLAYAASHA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE HOOS YIMAADA XEERKAN

Isbitaalka kasta oo UW Medicine ah waxa uu leeyahay liiska xirfadlayaasha daryeelka caafimaad oo adeegyadoodu hoos yimaadaan xeerkan. La xidhiidh isbitaalka ama tixraac www.uwmedicine.org/financialassistance wixii liiska isbitaalka ah:

- **Harborview Medical Center**
- **Northwest Hospital & Medical Center**
- **UW Medical Center**
- **Valley Medical Center**

KA EEGIS

- Sharciga Maamulka Washington, Cutubka 246-453, “Kaalmada Dhaqaalaha Isbitaalka” oo tixraaca gaarka ah ee soo socda leh:
  - WAC 246-453-020 Hannaanka isku midka ah ee lagu aqoonsado dadka deegaanka asalka u ah
  - WAC 246-453-030 Shuruudaha xogta lagu aqoonsado dadka deegaanka asalka u ah
  - WAC 246-453-040 Shuruudaha isku midka ah ee lagu aqoonsado dadka deegaanka asalka u ah
- RCW 70.170.060 Kaalmada Dhaqaalaha — Dhaqamada iyo xeerarka mamnuuca ah iyo kuwa looga baahan yahay isbitaalada
- 26 USC §501(r)(5)(A) iyo (B)
- Xeerka Biilka iyo Ururinta NWH
- Xeerka Biilka iyo Ururinta VMC
- Xeerka Biilka iyo Ururinta UWMC iyo HMC
- Lambarka Xeerka UW Medicine COM-007 – “Arjiga iyo u Hoggaansanaanta Sharciga Daawaynta Caafimaadka Gurmadka Degdegga ah iyo Shaqaalaha Shaqeeya (EMTALA)”

LIFAAQYADA:

Lifaaqa 1: Foomka iyo Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha - Qarsoodi
TAARIIKHAHA DIB U EEGIDDA: 3/2/2015, 3/23/2016, 4/18/2016, 10/2/2017, 10/1/2018